

*Shirar ay kalsooni ku
dheehan tahay.*

Somaliska www.soyya.se 2009



Ma u baahan
tahay ruux ku
taakuleeya?

Ku soo dhawoow inaad la
xiriirto Golaha bukaansocodka
(Patientnämnden)

08-690 67 00 (8.30-16.00)

Cinwaan boosto:
Patientnämndens förvaltning
Box 17535, 118 91 Stockholm

Cinwaan booqasho:
Hornsgatan 15, Stockholm

Fax 08-690 67 18

E-boosto registrator@pan.sll.se

www.patientnamndenstockholm.se

Xaq baad u leedahay ruux ku taakuleeya

Adigaaga khasabka lagugu daryeelayo oo lagu tiigsaday sharciga (1991:1128) daryeelka khasabka ah ee maskaxda (LPT) ama sharciga (1991:1129) daryeelka maskaxda ee ay maxkamad soo xukuntay (LRV) waxaad xaq u leedahay inaad hesho ruux ku taakuleeya (stödperson) muddada uu kugu socdo daryeelka khasabka ah iyo xitaa afar toddobaad markaa ka dib haddaad adiga iyo ruuxa ku taakuleynayaa aad taa dooneysaan.

Ruuxa ku taakuleeya

- waa ruux dadka xiiseeya
- wuxuu kuu taakuleynayaa baniaadanimo, wuxuuna kaa caawinayaa arrimahaaga gaarka ah
- wuxuu xaq u leeyahay inuu qeybta ama meesha kale ee aad ku jirtaa uu kugu booqdo
- wuxuu xaq u leeyahay inuu garsoorkaaga goobjoog ka noqdo, waa haddaad taa dooneysid
- waxaa saaran mas'uulyad sir-xajin.

Ruuxa ku taakuleeya looma oggola

- inuu baddelo hawlwadeennada daryeelka
- la wareego mas'uulyadda dhaqaalahaaga
- inuu noqdo wakiilkaaga sharci.

Adigaaga khasabka lagugu daryeelayo waxaad xaq u leedahay

- inaad go'aanka daryeelka khasabka ah aad uga dacwooto Maxkamadda hoose ee maamulka
- sharciyaqaan kaa tiiriya garsoor maxkamadeed
- inaad hesho ruux ku taakuleeya (stödperson) oo uu kuu magacaabo Golaha bukaansocodka (Patientnämnden).

Ruux ku taakuleeya waxaad ku heli kartaa

Adigoo taa kala hadla xiriiriyahaaga, daryeelahaaga ama takhtarkaaga oo markaa kugu xiriirinaya Golaha bukaansocodka (Patientnämnden). Waxaad xitaa buuxin kartaa foomka halkaan ku yaala oo aad fax ama boosto ugu diri karto maamulka Golaha bukaansocodka.

Fax

Fax 08-6906718



Warqad

Patientnämndens förvaltning
Box 17535
118 91 Stockholm



Telefon

Wixii faahfaahin ah waxaad ka heli kartaa Golaha bukaansocodka (Patientnämnden) adigoo ka waca telefonka 08-690 67 00.



Waa maxay Golaha bukaansocodka?

Golaha bukaansocodka (Patientnämnden), oo ka madaxbannaan maamullada daryeelka caafimaad, waxaad xitaa adigaaga bukaansocodka ah ula tagi kartaa dacwo ama su'aalo ku saabsan daryeel caafimaad. Golaha wuxuu ku dadaalayaa inuu dhibaatooyinka uga hortago dhegeysi, xal-soo-jeedin, warbixin iyo baaritaan ku wajahan wixii ku gaaray. Golaha bukaansocodka awood uma laha inuu xaalad jirtaa tallaabo ka qaado ama uu xaal ku siiyo. Hawlwadeennada dhammaantoodna waxaa saaran mas'uulyad sir-xajin.

Codsi ruux ku taakuleeya

Ruuxa halakan saxiixay, oo khasabka lagu daryeelayo isagoo loo tiigsaday sharciga daryeelka khasabka ah ee maskaxda (LPT) ama sharciga (1991:1129) daryeelka maskaxda ee ay maxkamad soo xukuntay (LRV), wuxuu codsanayaa in loo magacaabo ruux taakuleeya (stödperson).

Isbitaal-yare

Cinwaan boosto

Qeyb

Xiriiriyeyaal/Mas'uulyiin daryeel

Telefon qeyb

Telefon bukaansocod

Stockholm taariikh

Saxiix

Magac saddexan

Lambar-aqoonsi